



Wacaasha Ka Soo Korodhay Isboortiga: Aiden Smith ka Lincoln, Kaiya Robertson ta Franklin ayaa ku Guulaystay Horyaalada Wadanka ee PIL

Kadib markii la kansalay 2020 kii safmarka COVID-19 awgii, Horyaallada Wadanka ee Dugsiyada Ka Dhex Dhaca ee Portland waxa ay soo noqdeen toddobaadkii hore, laba ka mid ah ardayda fasalka afraad ee dugsiga sare ku jirtaana waxa ay ku guulaysteen koobabka shakhsiyeed. Aiden Smith oo ka socda Lincoln ayaa la tegey tartankii inamada, Kaiya Robertson oo ka socota Franklin waxa ay qaaday koobka hablaha ee Lents Park.

Smith waxa uu dhigay rikoodh shakhsiyeed isaga oo orday masaafo ah 5,000-mitir muddo 14 daqiiqo, 50.4 ilbidhiqsi ah, isaga oo ka hor dhammeeyey 23.7 ilbidhiqsi ka hor orodyahankii ku soo xigay, arday fasalka afraad dugsiga sare ee Franklin ka socda oo ah Charlie North. Wakhtigii Smith waxa uu ka dheeraynayey 2 daqiiqo markii uu orday tartanka PIL ee Lents Park 2019 kii, markii uu galay kaalinta 18aad.

Smith waxa uu ku hogaamiyey Lincoln horyaalka kooxda inamada iyada oo Cardinals ka ay ku dhamaysteen 35 dhibcood iyaga oo kaalinta labaad kaga guulaystay Franklin laba dhibcood. Ardayga fasalka afraad ee dugsiga sare ee Tucker Bowerfind (kaalinta saddexaad), ardayga fasalka saddexaad ee dugsiga sare ee Samy Anderson (afraad), ardayga fasalka saddexaad ee dugsiga sare ee JahAllah Van (12aad) iyo ardayga fasalka afraad ee dugsiga sare ee Joshua Fravel (15aad) ayaa usoo khatimay dhibco keenista Lincoln.

Marka laga tago Waqooyiga, ardayda fasalka afraad ee dugsiga sare ku jirta ee Paul Beaven (lixaad) iyo Gwilym Horner (siddeed), iyo ardayda fasalka saddexaad ee dugsiga sare ku jirta ee Sheadon Ocker (10aad) iyo Oscar Ponteri (11aad) waxa ay dhibco u xaqiijiyeen Franklin.

Tartanka hablaha, Robertson waxa ay oroday 17:19.5 waxana ay ka hor dhamaysay 7.3 ilbidhiqsi ardayadda fasalka afraad ee dugsiga sare ee Lincoln ee Kendall York. Fasalka labaad markii ay ahayd dugsiga sare 2019 kii, Robertson waxa ay ku gashay kaalinta afraad 17:53.6.

Lincoln sidoo kale waxa ay ku guulaysatay koobka kooxda hablaha halkaas oo York ay ku biireen afar ay isku koox yihiin oo 10 ka ugu sarreeya ku jira: ardayadda fasalka labaad ee dugsiga sare ku jirta ee Keira Saavedra (afraad), ardayadda fasalka afraad ee dugsiga sare ku jirta ee Riley Cash (shanaad), ardayadda fasalka saddexaad ee dugsiga sare ku jirta ee Eva Novy-Hildesley (toddobaad) iyo ardayadda fasalka afraad ee dugsiga sare ku jirta ee Emily Rehn (sagaalaad). Ida B. Wells ayaa soo dhigtay afar orodyahan oo ku jira 10 ka ugu sarreeya si ay ugu guulaystaan kaalinta labaad. Waxa ay ahaayeen ardayadda fasalka afraad ee dugsiga sare ku jirta ee Charlotte Richman (saddexaad), ardayadda fasalka labaad ee dugsiga



sare ku jirta ee Josie Fale (lixaad), ardayadda fasalka saddexaad ee dugsiga sare ku jirta ee Petra Schuster (siddeedaad) iyo ardayadda fasalka labaad ee dugsiga sare ku jirta ee Olivia Kozitza (10aad).

Kulanka PIL sidoo kale waxa uu ugu shaqaynayey isreebreeb ahaan horyaallada gobolka ee Heerka 6A kaas oo lagu qaban doono Sabtida Lane Community College ee ku taalla Eugene. Inamada Lincoln, kuwaas oo galay kaalinta 3aad ee [codeynta tababareyaasha gobolka oo dhan ee kama dambeysta ah](#), iyo Franklin, oo gashay kaalinta 4aad, ayaa ku jira kooxaha isku carin kara koobka kooxaha gobolka. Ida B. Wells, oo uu hogaaminayo ardayga fasalka saddexaad ee dugsiga sare ku jira ee Kai Mitchell-Reiss (shanaad ka ah PIL) iyo ardayga fasalka afraad ee dugsiga sare ku jira ee Dublin Gingerich (sagaalaad), ayaa sidoo kale u soo baxay tartanka inamada, kaas oo bilaabmaya 3:30 g.d. Ardayga fasalka saddexaad ee dugsiga sare ee Roosevelt ku jira ee William Heslam, kaas oo kaalinta toddobaad ka galay tartankii PIL, ayaa u soo baxay shakhsi ahaan.

Tartanka hablaha, saddex kooxood oo PIL ah ayaa ka galay shanka ugu sarreeya [codaynta gobolka ee kama dambeysta ah](#) – Kaalinta 3aad waxa galay Lincoln, kaalinta 4 aad waxa galay B. Wells kaalinta 5aadna waxa galay Franklin – waxana ay ku tartami doonaan Eugene. Kooxda Franklin waxa ku jira ardayda fasalka labaad ku jira dugsiga sare ee Marin Kauffman-Smith (11aad ka ah PIL) iyo Gigi Bareilles (14aad), ardayga fasalka koowaad ku jira dugsiga sare ee Hailie Robertson (15aad), ardayga fasalka koowaad ku jira dugsiga sare ee Emily Robertson (17aad), iyo ardayadda sanadka afraad ku jirta dugsiga sare ee Alena Krull (20aad). Tartanka gobolka ee habluhu waxa uu bilaabmayaa 2:55 g.d.